Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay : https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Agoosto 31, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka
Ujeedada: Xeerarka tallaalka shaqaalaha daryeelka caafimaadka

Fadlan akhri farriintan oo dhan si aad u aragto sida Xeerka Goobaha Daryeelka Caafimaadka iyo Amarka Fulineed ee ku saabsan shuruudaha tallaalka kuu khuseeyo.

Nidaamka naafanimada korriinka dhexdiisa, waxaanu arkaynaa kiisaska COVID-19 oo sii kordhaya. Dadka ayaa weli la jiranaya oo u dhimanaya fayraskan xun. ODDS waxaa ka go'an amarrada Guddoomiyaha iyo caafimaadka iyo badbaadada.

Tallaalka laga hortagayo COVID-19 wuxuu si weyn u wanaajiyaa natiijooyinka dhammaan. ODDS ayaa si adag ula shaqeysay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD), qoysaskooda, iyo daryeel bixiyayaasha si ay uga caawiso wacyigelinta tallaalka iyo macluumaadka. Xaalada ugu fiican ee suurtagalka ah waa shaqaalaha la tallaalay ee u adeegaya dadka qaba I/DD ee sidoo kale la tallaalay

Bisha Ogoosto 19, Guddoomiyaha Gobolka Brown ayaa ku dhawaaqday in shuruudaha tallaalka ee Oregon ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka caafimaadku aysan hadda ka dib lahaan doonin midka beddelka ee ah in la is baaro. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxaa looga baahnaan doonaa in ay si buuxda u tallaalin yihiin muddo aan ka dambeyn Oktoobar 18, 2021.

Xeerka Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu soo baxay Ogoosto 25. Iyada oo loogu talagalay nidaamka naafanimada korriinka, shuruudaha tallaalka waxaa ka mid ah guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood iyo goobta daryeelka dadka waayeelka ah ee I/DD.

Heerku wuxuu sidoo kale amar ku bixinayaa in qofka lacagta la siiyo ama aan la siinin ee shaqeeya, wax barta, wax darsa, taageera, la socda ama tabaruc ahaan uga shaqeeya goob daryeel caafimaad oo bixisa daryeelka meel la degan yahay oo toos ah iyo qof kasta oo awood u leh in si toos ah ama si aan toos ahayn isku soo gaaraan dadka degan waa in sidoo kale la tallaalaa muddo ku beegan ama ka horreysa Octoobar 18, 2021.

Sababtaasi awgeed, xeerkani waxaa ku jira shaqaalaha Hay'ada Maamulka Kiiska iyo Hay'ada Medicaid ah ama Daryeel Bixiyaha ama Qandaraaslaha kasta oo kale oo si shakhsi ahaaneed uga shaqeeya Guriga Koox ahaanta Loo degan yahay 24-ka Saacadood iyo Goobta Daryeelka Dadka Waayeelka ah ama xiriir toos ah ama aan toos ahayn la leh qof kasta oo degan Guriga Koox ahaanta Loo degan yahay 24-ka Saacadood iyo Goobta Daryeelka Dadka Waayeelka ah sabab kasta ha ahaatee oo ay ku jirto la socosho, ruqsad bixinta, baaritaannada, gaadiidka, wax ka beddelka guriga, iwm.

Waxaad heli kartaa macmuulaad dheeraad ah oo ku saabsan iska reebida dhanka diinta iyo caafimaadka oo ku jira xeerka iyo dhanka internet-ka oo ku jirta Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Maamulka Caafimaadka Oregon.

Intaasi waxaa dheer, in bisha Ogoosto 13, Guddoomiyaha Gobolka Brown ay soo saartay Amarka Fulineed 21-29 ("EO 21-29") kaasi oo dhammaan shaqaalaha gobolka ee waaxda fulinta uga baahan in ay si buuxda u tallaalin yihiin muddo aan ka dambeyn Oktoobar 18, 2021. Amarkani Fulineed wuxuu sidoo kale khuseeyaa qandaraaslayaasha gobolka ama "shaqaalaha" ee ay tahay in ay si shakhsi ahaaneed u joogaan goobta shaqada ee Waaxda Fulinta ama xafiiska gobolka. Kani ma khuseeyo soo booqdayaasha ama macaamiisha xafiisyada gobolka.

Sababtani awgeed, Isku duwaha Adeegyada/Wakiilka Shakhsiyeed, Hay'adaha Medicaid, Daryeel bixiyayaasha ama Qandaraaslayaasha kale ee ay tahay in ay si shakhsi ahaaneed u joogaan xafiiska gobolka oo ay ku jiraan balse aanan ku koobnayn Tababarka Dhaqancelinta, Dadka

Waayeelka ah ee Naafada ah, Daryeelka Carruurta, iyo xafiisyada qaybta Isku-Filnaanshaha, xafiisyada maamulka ee ODDS oo ay ku jiraan Meelaha Carruurtu Degan tahay iyo xafiisyada Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka (SACU), guryaha SACU, iwm, waa in sidoo kale la tallaalaa muddo ku beegan ama ka horreysa Octoobar 18, 2021.

Fadlan fiiri EO 21-29 wixii faahfaahin dheeraad ah.

Hay'adaha daryeelka bixiyaa waxay amri karaan tallaalada loogu talagalay shaqaalahooda bixiya adeegyada ee aanan ku jirin shuruudaha gobolka, sababta oo ah go'aaminta ODDS ayaa ah in adeegyadaasi aysan khuseynin wixii xeer ah ee mamnuucaya shuruudaha tallaalka. Hay'aduhu waa in ay la taliyahooda gaarka u ah kala tashadaan su'aalaha dheeraadka ah haddii loo baahdo.

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ayaa fahamsan yahay in xeerarkani ay culays dheeraad ah saari doonaan daryeel bixiyayaasha ay isla hadaba soo wajahday shaqaale yaraantu. Iyada oo ka jawaabaysa, ODDS ayaa iskugu yeertay kooxo daryeel bixiyayaal si loo heli xalal abuur leh. Waxaanu fiirinaynaa hab kasta oo suurtagal ah si loo taageero guryaha koox ahaanta loo degan yahay iyo guryaha daryeelka dadka waayeelka ah into lagu jiro muddadaasi. Mudnaantu waxaa leh caafimaadka iyo badbaadada dadka qaba I/DD. ODDS waxay sameyn doontaa wax kasta oo suurtagal ah si loo taageero bulshada daryeel bixiyaha ah iyo Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah ee u adeega dadka qaba I/DD.

Waxaanu dadka la wadaagi doonaa faahfaahin dheeraad ah isla marka aan helno macluumaad. Fadlan su'aalaha u dir DD.DirectorsOffice@dhsoha.state.or.us. ODDS waxay daabici doontaa Codsiga Tallaabo qaadida oo wata macluumaad dheeraad ah oo laga helayo https://go.usa.gov/xMq3R.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty

Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.